

# KU SOO DHAWOW BARNAAMIJKAYAGA TIJAABADA ISTICMAALKA TAMARTA EE SOO SOCDA

Xcel Energy®

## KU SOO DHAWOW BARNAAMIJKAYAGA TIJAABADA ISTICMAALKA TAMARTA EE SOO SOCDA.

Xcel Energy ayaa daahfuraysa tijaabo si laguu siiyo macluumaad wanaagsan oo ku saabsan isticmaalka korontadaada si aad u gaarto go'aamo tamareed oo waxgal ah. Waa mid ka mid ah siyaabaha aan u adeegsanayno tiknoolajiyada casriga ah si aan u abuurno fiilooyin tamar oo casri ah kuwaasoo naga caawin kara inaad kuugu adeegno si wanaagsan oo aan kuu siino fursado badan mustaqbalka.

## WUXUU KU BILAABMAA MIQYAASKA KORONTADA EE CASRIGA AH.

Waxaad ka mid tahay 17,500 degganeyaal oo loo xulay inay ka qeybqaataan tijaabadan. Qof kasta oo ka qaybqaadanaya wuxuu heli doonaa miqyaas koronto cusub, oo lagu casriyeeyay tiknoolajiyad aad u sareeysa. Miqyaaskaaga jira wuxuu kaliya kuu sheegi karaa inta ay la egtahay tamarta aad isticmaalayso, balse ma sheegi karo marka aad isticmaalayso koronto. Marka aad miqyaaskan cusub haysato, waxaad arki kartaa inta ay la egtahay tamarta aad isticmaashid iyo marka aad isticmaashay, ilaa shatii daqiiqaba mar.

## QORSHAHA QIIMAHA CUSUB

Dhammaan macaamiisha loo xushay tijaabadan ayaa heli doona miqyaas cusub, macaamiisha qaarkoodna waxaa lagu qori doonaa qorshaha cusub kaasoo sicirka korontada isbbedeli karo iyadoo ku xiran waqtiga lagu jiro.

Waxaad ku jirtaa koox ka mid ah macaamiisha kuwaasoo u wareegi doona qorshaha tijaabada qiimaha. Markaas, laga bilaabo Abriil 2020 ilaa iyo inta lagu jiro labada sano ee tijaabada, waxaad ka bixin doontaa lacag yar korontada aad isticmaashid dhammaadka fiidkii iyo saqda dhexe ka dib marka korontada raqiis tahay in la soo saaro. Qiimaha korontada inta u dhaxeysa 3 galabnimo. iyo 8 galabnimo maalmaha asbuucyaaqada wuu sareyn doonaa—si loo yareeyo kharashka dhabta ah ee soo saaridda tamarta. Taasi waxaa loola jeedaa, haddii aad isticmaali kartid tamar yar inta lagu jiro xilligaas, waxaad fursad u haysataa inaad tashiilato lacagta.

## DHABBE U XAARIDA U ISTICMAALKA TAMARTA SI XEELAD LEH

Kharashka korontada wuu sareeyaa si loo soo saaro marka baahidu sarreyso. Taasi waxaa ugu wacan marka macaamiishu ay isticmaalayaan tamarta ugu badan, waxaan inta badan u baahanaa inaan ka helno tamar ilaha kharashka badan waxaana ku tiirsanaanaa shidaalka, kuwaasoo si aad ah aan ugu fiicneyn bay'adda.

Tijaabadan waxay adeegsan doontaa tiknoolajiyad la casriyeyay si ay kuu siiso aragti dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u isticmaashid korantada, oo tiknoolajiyadu waxay sidoo kale naga caawin doontaa inaan si fiican u maareyno fiilooyinka tamarta, iyo ka falcelinta koronto la'aanta si dhakhso ah. Ugu dambeyntii, tijaabadan waxay gacan ka geysan doontaa qaabeynta qiimaha korontada mustaqbalka ee loogu talagalay macaamiisha Xcel Energy ee ku sugan Minnesota.

## ESTO ES LO QUE SUCEDERÁ.

Comenzaremos a instalar los nuevos medidores en los próximos meses. Le informaremos cuando se acerque su fecha de instalación programada. En la mayoría de los casos, no tendrá que estar en casa para la instalación.

## QIIMAHAAGA CUSUB WUXUU BILAABAN DOONAA ABRIIL 1, 2020.

Waxaan kuu soo diri doonaa macluumaad badan oo dheeraad ah waqti hore marka aad isku diyaarinayso qiimaha cusub.


Haddii macaamiisha ka mid ah tijaabada isticmaalaan tamar yar inta u dhaxeysa 3 galabnimo iyo 8 galabnimo maalmaha asbuucyaaqada:

- Waxaad heli doontaa fursad aad ku tashiilato lacagta biilka korontada.
- Waxaan iska ilaalin karnaa dhisida warshad koronto oo cusub mustaqbalka, hoos u dhigaysa kharashka qof kasta.
- Waxaan isticmaali karnaa xitaa tamarta la cusbooneysiin karo waxaana si yar ugu tiirsanaan karnaa ilaha korontada ee dhaliya kaarboonka.

Celcelis ahaan, biilasha kaqaybqaatetaasha waxay ahaan doonaan sidooda.

Gaar ahaan, biilka macmiil kasta wuxuu ku xiran yahay isticmaalkooda saxda ah ee korontada.
U wareejinta qaar ka mid ah isticmaalka korontadaada saacadaha ka baxsan saxmada waxay kaa caawin doontaa tashiilashada biilkaaga.

**Waqtiyada tijaabada qiimaha**




*Maalmaha shaqada

## YAREYNTA BIILKA KORONTADA

Waxaad haysataa fursad aad ku tashiilato inta lagu jiro labada sano ee tijaabada, balse waxaan bixin doonaa ilaalinta biilka sanadka koowaad haddii biilashaadu la kordhaan qiimaha cusub.

Haddii biilashaada dhammaadka sannadka ugu horeeya, ee tijaabada ay ka badan yihiin 10% in ka sarreeya waxa ay noqon lahaayeen marka loo eego qiimaha caadiga ah, waxaan ku siin doonaa deyn biileed hal mar ah oo u dhiganta qaddarka ka sarreya 10% kaas.

Haddii aad isku diiwaangelisay kaalmada tamarta, biilashaada ma kordhi doonaan sannadka koowaad. Wali waad tashiilan kartaa biilkaaga adigoo u wareejinaya isticmaalka korontadaada saacadaha saxmada ugu sareyso, balse haddii aad tashiilan, waxaad heli doontaa deyn biileed bil kasta ah si ay u waafaqaan waxa ay noqonayaan marka la isticmaalayo qiimaha caadiga ah. Si aad wax badan uga ogaato wax ku saabsan barnaamijyada kaalmada, naga soo wac 800.895.4999.

## MA DOONEYSID INAAD KAQEYBGASHID? KALIYA NAGA SOO WAC 800.895.4999.

Haddii aad iska dhaafto, ma heli doontid miqyaas cusub oo waxaa lagaa saarayaa tijaabada. Waxaad sidoo kale iimaylka noogu soo diri kartaa inquire@xcelenergy.com si aad isaga dhaafto waqti kasta inta lagu jiro tijaabada.



**WAX SU'AALO MA KA QABTAA MIQYAASKAAGA CUSUB?**
Ka raadi xitaa jawaabo dheeraad ah **xcelenergy.com/PilotSoo**.

**Goorma ayaan heli doonaa miqyaas cusub?**
Waxaan rakibi doonaa miqyaaskaaga cusub goor-uun inta u dhaxaysa Oktoobar 2019 iyo Maarso 2020. Waan ku ogeysiin doonaa taariikhda rakibidaada qadarinta mudan qiyaastii labo bilood ka hor waana ku ogeysiin doonaa marka aan u dhownahay taariikhdaas.

**Waa maxay miqyaas casri ah**
Miqyaaska casriga ah wuxuu oggolaada xiriir laba dhinacle ah oo u dhaxeeya miqyaaska korontadaada iyo Xcel Energy. Miqyaasyada cusub ee casriga ah waxay ku siinayaan faa'idooyin badan, ay ka mid yihiin oggaanshaha koronto la'aanta ee la wanaajiyay iyo jawaab-celinta, barnaamijyada bogeed ee mustaqbalka kaa caawin kara inaad gaarto go'aamo waxgal ah oo dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalkaaga tamarta, iyo barnaamijyada iyo adeegyada sida tijaabadan, taasoo kaa caawin karta inaad tashiilato tamarta iyo lacagta.

**Sidee ayaa loo sameeyaa rakibidda miqyaaska?**
Rakibidda miqyaaska waa mid fudud oo dhakhso ah. Shaqaalaha Xcel Energy oo lebisan ama qandaraasle wada kaarka aqoonsiga ayaa soo garaaci doona albaabkaaga si uu kuu ogeysiiyo inay imaadeen, balse lagaagama baahna inaad guriga joogto ilaa iyo inta aan si badqab ah u heli karno miqyaaskaaga. Rakibidda miqyaaska waxay qaadan doontaa qiyaastii 10 daqiiqo; korontadaada ayaa laga yaaba inay danto wakhti kooban. Marka aan si guul leh u beddelno miqyaaskaaga, waxaan kuu dhaafi doonaa macluumaad aad ku ogaato. Haddii ay jirto arrin naga horjoogsata rakibidda, waxaan kaga tegi goonaa albaab-sur ku qoran lambarka teleefoonka nagala soo xiriiro iyo macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan talaabooyinka xiga.



xcelenergy.com | © 2019 Xcel Energy Inc. | Xcel Energy is a registered trademark of Xcel Energy Inc. | 19-07-511